# Qiimaynta lagu sameynayo Adeegga Turjubaanka Bilaashka ah ee xirfadlayaasha caafimaadka allied health

Dawlada Australia waxay tijaabinaysaa adeeg cusub oo siinaya dadka aan luuqada ingiriiska ku hadlin inay helaan turjubaano lacag la'aan ah markay isticmaalayaan adeegyada caafimaadka ee gaarka ah sida cilmu-nafsiga, dhakhaatiirta indhaha iyo jir-dhiska fiisiyoterabiga (physiotherapists). Dawladdu waxay weydiisatay Saaxiibada Daryeelka Caafimaadka Australia (Australian Healthcare Associates - AHA) inay soo ogaadaan in turjubaanada lacag la'aanta ah ay dadka ka caawiyaan inay si fudud u helaan daryeel caafimaad.

Maadaama aad isticmaashay adeegga cusub ee turjubaanka, da'daaduna ay ka weyn tahay 18 sano, waxaanu ku weydiinaynaa inaad ka qeyb qaadato xog-ururin aan sameynayno.

Xaashida macluumaadka iyo xog-ururinta ayaa laga heli karaa onlaynka iyadoo ku qoran luqadaha soo socda:

- Carabi
- Burma
- Dari
- Karenni
- Kurdi (Kurmanji)
- Persian (Farsi)
- (S’Gaw) Karen
- Soomaali
- Turkish
- Vietnamese

Waxa kale oo aad xog-ururinta ku samayn kartaa taleefanka adiga oo isticmaalaya turjubaan lacag la'aan ah ama waxaad codsan kartaa nuqul qoraal ah.

Waxay qaadan doontaa ilaa 15 daqiiqo. AHA waxay ku siin doonaan kaadhka hadiyadda (gift card) si ay kaaga mahadceliyaan wakhtigaaga.

Wixii macluumaad dheeraad ah ama si aad u bilowdo, midkood:

- Booqo Free interpreting service evaluation.
- Kala xidhiidh AHA 61 3 8632 9503 ama FIS.evaluation@ahaconsulting.com.au . Waxaad ka codsan kartaa inay su'aalaha kugu weydiiyaan taleefoonka (iyagoo kuu qabanaya turjubaan haddii aad u baahan tahay), ama inay kuu soo diraan macluumaad qoran oo ah nuqul ka mid ah su'aalahooda iyo baqshad aad ugu diri karto.

Haddii aad doonayso inaad ka qayb qaadato, xilli kasta ayaad taas sameyn kartaa inta aan la gaarin 31-ka bisha Oktoobar ee 2025.